

Xeerka Wasiirka Maaliyadda

11 Maarso 1970 lamba. 56.

Abuuridda Sanduuqa lagu Goynayo qiimaha shidaalka.

WASIIRKA MAALIYADDA DAWLADDA

Marka uua arkay Xaasida koowaad Kacaanii 21 Oktoobar 1969 iyo Xeerka 21 Oktoobar lamb. 1;

Marka uu arkay Dekereetada Baarlamaanka 29 Disembar 1961, lamba. 2, kuna saabsan Nidaamka Maamulka Xisaabaadka;

Marka uu arkay P. R. 17 Dicembar 1962, lamba. 317 kuna saabsan Nidaamka xisaabaadka Dawladda;

Marka uu arkay Xeerka 14 Feberaayo 1970, lamba. 10 oo lagu dhimayo canshuuraha kastanka ee soo dejinta shidaalka;

Marka uu tixgaliyay baahida loo qabo in la gaaro ulajeeddada Xeerka 14 Feberaayo 1970, lamba. 10, in lagu shubo Sanduuq Gaara faraqa u dhexeeya canshuurtii hore iyo canshuurta cusub ee shidaalka;

Marka uu garowsadya in ay habboontahay in la dhisoo si waafaqsan qod. 154 ee Nidaamka xisabaadka Dawladda, Santuuq lagu dejinayo qiimaha shidaalka oo loola jeedo kutalka gaarka ee lagu wajahayo isbaddalka sicirka shidaalka;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

1. Laga billaabo 16 Feberaayo 1970 waxaa la abuuray si waafaqsan qod. 154 nidaamka Xisaabaadka Dawladda, Santuuq Gaara oo ku yaalla Bangiga Dhixe Qaranka oo ku magacaaban “Santuuma Xasilinta qiimaha shidaalka, kaaso leh hawlahaa lacageed gaarka ee lagu maalgelinayo kharsashka isbaddalaya (kharashka badda, ilaalinta, iwm) ee shidaalka;
2. Xisabaadka Sanduuqa Gaarka ah waxaa lagu haynayaa Xaafiska Xisaabaadka Guud isla qaabka habraaca baarista xisabaadka miisaaniyadda u degsan;
3. Lacagaha la shubayo waa in laga sameeyaa shan nuql oo kala duwan, oo uu horay Xisaabiyyaha Guud Dawladda u soo hubiyay.

Qod. 2

Faraqa u dhaxeeya qiimaha canshuurta hore ee shidaalka dalka la keeno iyo canshuurta cusub ee ku xusan Xeerka 14 Setembar 1970, lamba. 10 sidan ayaa loo gooyay:

a) Batroolka, biyaha raajada iyo baatrolka dayuuradaha iyo wixii kale:

— Santuuqa Xasilinta	Sh. Som. 8,80 halkii litir
— ENC marka lagu daro xuquuqda hore dallaalka Sh. Som. 0,30	Sh. Som 0,20 halkii litir

Wadarta: Sh. Som. 9,00 halkii litir

- b) Gasoliinka iyo waxyaabaha iyo dahabka aayaar gubtaaga:
- Santtuuqa Xasilinta Sh. Som. 3,80
 - Enc markalagu daro xuquuqda hore dallaalka Sh. Som. 0,20
Sh. Som. 0,30
- c) Batroolka wax lagu ifiyo
- Santtuuqa Xasilinta: Wadarta: Sh. Som. 4,00 halkii litir
 - Sh. Som. 3,00 halkii litir

Qod. 3

Dekereetadaan waa in loo gudbiyaa Hantidhowrka Guud.

Wasiirka Maaliyadda

M. Cabdi Arraleh

La hubiyay iyo La diiwaangeliyay – Diw. lamba. 1, bogga lamba. 48.

Muqdisho, 14 Maarso 1970.

Hantidhowraha Guud: **Mohamud Issa Salwe**